IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH
# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 1 Juunyo 1981 Lr. 6

FAAHFAAHINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S.

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sannadii waa Sh. 100 Somaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoriitaanka waxaa la weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda lacagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

W. M.

QAYBTA LABAAD

| | |
|---|---|
| XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 26 ee 12 ABR. 1981, Hay'adda Qaqootiga Qaranka | Bogga 865 |
| XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 27 ee 10 ABR. 1981, La wareegid dan Guud awgeed Laba Guri ku yaal Degmada Shangaani, uuna lahaa Shariif Saalax Xasan.— | 875 |
| XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 28 ee 1 NOF. 1980, Magacaabid Kaaliyaha Arr. Maamulka.— | 877 |
| XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 29 ee 10 FEB. 1981, Xeer Nidaamiye lagu Fulinaayo Xeerka Qoyska.— | 879 |

Wakaaladda M. Qaranka

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 30 ee 11 Maajo 1981, Magacaabid Maamulaha Sare ee Hayad : Qaqodiga.— 884

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 31 ee 28 FEB. 1981, Dallacaad Saraakiileed 885

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 32 ee 3 Maarso 1981, Dallacaad Saraakiileed 886

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 33 ee 28 ABR. 1981, U magacaabid Jaalle Ismaaciil Cali Abookar Madaxweyne Kuxigeenka 3aad ee Jamhuuriyadda. 887

XEER WASAARADDA X. X. Dhirta iyo Daaqa 34 ee 24 Maarso 1981, Diiwaangelin Shirkadda Naaxinta Xoolaha ee Est Afrika.— 888

# QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. Lambr 26Taariikh 12 Abriile 1981

## HAY'ADDA QAXOOTIGA QARANKA.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga 14 ee 3dii Juunyo 1962 (Sharciga Nidaamka Dawladda) iyo beddelaadyadii ka dambeeyey;

MARKUU ARKAY: Xeerka Madaxweynaha JDS Lam. 403/120 oo lagu dhisay Hay'adda Qaxootiga Qaranka;

MARKUU TIXGELIYEY: Ujeeddada Martigelinta Qaxootiga oo ah in Dawladda iyo Shacbiga Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ay Gacan Aademinimo ka geystaan badbaadinta nolosha iyo jiritaanka dadka Qaxootiga ah, isla markaana, iyadoo lala kaashanayo Adduunweynaha Nabadda Jecel ee aqoonsan Xuquuqda aadamiga, loo hawl galo Sahanka iyo qaadista tillaabo kasta oo suurtagelineyaa ku noqoshada Laaji'iintaas Dalkoodii Hooyo;

MARKUU ARKAY: In loo baahan yahay in inta laga gaarayo Himilada kor ku cad ee dib ugu noqoshada Qaxootiga Dhulkooda, loo sameeyo hab maamul hanan kara Masuuliyaddaas Culus ee weyn, loona Qaabeeyo Hay'adda Qaxootiga Qaranka weji ay ku gudan karto xilkeeda;

MARKUU ARKAY: Waajibaadka ka saaran Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya Qaxootiga Dalka jooga, gaar ahaan ka kaalmeynta baahida nolosha ee nooc kastaba leh, lagama maarmaana ay u noqotay Hay'adda yeelata awood Go'aan gaarid iyo la xiriirid Dawladaha dibedda iyo Ururrada Samafalka ee Caalamiga ah, si loo badbaadiyo Dadkaas;

ISAGOO DHEGEEYSTAY: Golaha Wasiirrada;

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

(Dhismaha)

1) Waxaa dib loo habeeyey Hay'adda Qaxootiga Qaranka oo lagu dhisay Xeerka lambar 403/120.

2) Hay'addu waxay u madax bannaan tahay, iyadoo Sharciga dhawraysa, fulinta xilalka iyo ujeeddooyinka ku tilmaaman Xeerkan.

Qod. 2aad

(Saldhigga maamulka Hay'adda)

Dhanka maamulka, Hay'add waxay gaar ahaan u hoggaansameysaa Sharciyada iyo Xeerarka soo socda;

a) Sharciga lambar 5 ee Febraayo 1980, kuna saabsan Nidaamka Shaqaalaha Dawladda;

b) Sharciga lambar 36 ee 22ka Abriile 1972 iyo beddelaaddii ka dambeysay, Qodobbadiisa la socon kara dabeecadda Hay'adda;

t) Sharuudaha iyo Xeerarka habka xisaabaadka hantida Dawladda;

j) Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 47 15. 7. 1979, kuna saabsan «Habka hirgelinta heshiisyada aqoonsiga Qaxootiga».

Qod. 3aad

(Laamaha Hay'adda)

Hay'addu waxay Laamo ku yeelan kartaa, haddii loo baahdo, Gobollada iyo Degmooyinka dalka ee Qaxootigu deggan yihiin.

Qod. 4aad

(Ujeeddooyinka)

Ujeedooyinka Hay'addu waxay yihiin kuwan soo socda;

1) In ay qabato Qaxootiga dalka jooga ee aqoonsiga rasmiga ah leh;

2) In ay sahmiso, una hawl gasho, helitaanka wax-yaabaha lagama maarmaanka u ah nolosha iyo badbaadada Qaxootiga dalka ku sugan;

3) In ay habsami u fuliso heshiisyada lala galo Hay' adda Caalamiga ah ee Qaxootiga ama Hay'ad kasta oo kale ee caalami, ama Dawladaha Shisheeye, kuna saabsan daryeelka Qaxootiga;

4) In ay qabato, Kaydiso, xannaanayso, gaarsiisana Qaxootiga kaalmada loo fidiyo;

5) In ay qorsheyso, isu dudo una hawl gasho xaqiijinta arrimaha la xiriira daryeelka aayaha Qaxootiga ku jira Xerooyinka, iyadoo lala kaashanayo Hay'adda Qaranka ee ku shaqo leh, gaar ahaanna:

a) Dejinta Qaxootiga;

b) Waxbaridda iyo barbaarinta Dhallaanka Qaxootiga;

t) U hawlgalka ka haqabtiridda cunnada;

j) Daryeelka Caafimaadka;

x) Tababaridda dadka Qaxootiga ah ee wax qaban kara, iyo ka hawlgelinta danaha Qaxootiga;

kh) Xannaanada Dumarka, Carruurta, Dugsiyada iyo dadka tabarta yar ee Qaxootiga ah;

d) Abuuridda iyo xafidaadda diiwaannada dad-dhigidda ee Qaxootiga.

Qod. 5aad

(Awoodda)

Hay'addu, iyadoo raacaysa Xeerkan, waxay awood u leedahay:

1) In ay xiriir la yeelato Hay'adaha Caalamiga ah ee daryeelka Qaxootiga loo dhisay iyo Dawlad kasta oo dooneysa in ay deeq u fidiso Qaxootiga dalka jooga;

2) In ay ku dhaqaaqdo tillaabo kastoo lagu fulinaayo xilalka iyo ujeeddooyinka loo dhisay Hay'adda, iyadoo isla markaasna yeelanaysa qaab ay ku fuliso xilalkaas.

Qod. 6aad

(Aqoonsiga Qaxootiga)

Shuruudaha iyo habka loo marayo aqoonsiga Qaxootinimada waxaa tilmaamaya Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 47 ee 15. 7. 1979.

Qod. 7aad

(Xubnaha Hay'adda)

1) Hay'addu, si ay hawlahooda u fuliso, waxay yeelanaysaa Xubnaha soo socda:

— Guddiga Qaranka ee Arrimaha Qaxootiga;

— Maamulaha Sare ee Qaxootiga;

— Guddiga Maamulka iyo fulinta;

— Maareeyaha Guud ee Hay'adda;

— Maareeyaha Guud kuxigeen iyo Maareeyayaal;

— Isuduwayaasha Gobollada iyo Degmooyinka Qaxootigu deggan yihiin;

— Maamulayaasha Xeryaha Qaxootiga;

2) Maareeyaha Guud, Maareeye Guud ku-xigeenka iyo Maareeyayaasha waxaa lagu magacaabayaa, xilka looga qaadi karaa, ama lagaga beddeli karaa, Xeer uu soo saaro Madaxweynaha JDS.

3) Maareeyaha Guud, Maareeye Guud Ku xigeenka iyo Maareeyayaasha Hay'addu waxay qaadanayaan Gunnooyin u dhigan kan xilka iyo hoyga oo Wakaaladaha darajadoodu tahay (B).

4) Hay'addu waxay yeelaneysaa qaab u gaar ah oo lagu soo saaro Xeer Madaxweyne.

Qodobka 8aad

(Guddiga Qaranka ee Arrimaha Qaxootiga)

1) Guddiga Qaranka ee Arrimaha Qaxootigu wuxuu ka kooban yahay:

| | |
|---|---|
| — Madaxweynaha JDS ama cid uu wakiisho | G/ye |
| — Maamulaha Sare ee Qaxootiga | Xubin |
| — Wasiirka Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga | Xubin |
| — Wasiirka Biyaha iyo Macdinta | Xubin |
| — Wasiirka Waxbarashada iyo Barbaarinta | Xubin |
| — Wasiirka Caafimaadka | Xubin |
| — Wasiirka Beeraha | Xubin |
| — Wasiirka Qorsheynta | Xubin |
| — Wasiirka Maaliyadda | Xubin |
| — Maareeyaha Guud ee Hay'adda | Xoghaye. |

2) Guddiga waxaa isugu yeeraya Guddoomiyaha, wuxuuna yeelanayaa Bishiiba hal Fadhi ee Caadi ah.

3) Guddigu wuxuu yeelan karaa Fadhiyo aan caadi ahayn markay yimaadaan Duruufo aan Caadi ahayn.

Qodobka 9aad

(Guddiga Maamulka iyo Fulinta)

1) Guddiga Maamulka iyo Fulintu wuxuu ka kooban yahay:

— Maamulaha Sare ee Qaxootiga Guddoomiye
— Maareeyaha Guud ee Hay'adda Gud. Ku-xigeen
— Maareeye Guud Ku-xigeenka Xubin
— Maareeyayaasha Waaxyaha Hay'adda Xubno

2) Guddiga Maamulka iyo Fulintu waxay yeelanayaan Fadhiyo caadi ah, ugu yaraan Bishiiba Laba mar. Waxay kaloo yeelan karaan Fadhiyo aan caadi ahayn markasta oo uu isugu yeero Maamulaha Sare ee Qaxootigu.

Qodobka 10aad

Guddiyada Hoose)

1) Hay'addu waxay yeelaneysaa Gobollada iyo Degmooyinka Qaxootigu degganyihiin Guddiyada Hoose ee soo socda:

— Guddiga Arrimaha Qaxootiga ee heer Gobol;
— Guddiga Arrimaha Qaxootiga ee heer Degmo;
— Guddiga Xerada;
— Guddiga Xaafadda;
— Guddiga Cududda iyo
— Guddiga Laanta.

2) Xubnaha Guddiyadaas iyo Xilalka ay qabanayaan waxaa lagu tilmaamayaa Go'aan gaar ah.

Qodobka 11aad

(Maamulaha Sare ee Qaxootiga)

Maamulaha Sare ee Qaxootiga darajadiisu waa heer Wasiir, waxaa Xeer ku magacaabay Madaxweynaha JDS, Xilkiisuna wuxuu ka kooban yahay sida soo socota:

— Masilaadda Xiriirka Dibedda ee Hay'adda;
— U Bandhigidda Adduunweynaha dhibaatada Qaxootiga jooga Dalka J.D.S. isagoo ka qeyb gela-

ya Shirarka Caalamiga ah iyo Goboleed ee looga hadlaayo mashaakilka iyo daryeelka Qaxootiga Adduunka;

— Dejinta Siyaasadda Guud ee Hay'addu ku fulineyso ujeeddooyinkeeda;

— Saxiixa Heshiisyada lala galo Hay'adaha Samafalka ah iyo kuwa Caalamiga ah ee Shuruucda Dalku u oggoshahay, isagoo dhegeystay Ra'yiga Guddiga Qaranka ee Arrimaha Qaxootiga;

— Kormeerka Sixidda iyo amar ka bixinta arrimaha Maamulka Qaxootiga, markasta oo loo baahdo;

— Dejinta iyo ka ansixinta Guddiga Qaranka ee Arrimaha Qaxootiga habka iskaashiga iyo wada shaqaynta Hay'adda iyo Wakiillada ama Ergooyinka Ururada iyo Hay'adaha Samafalka Caalamiga ah ee Dalka Jooga;

— Xogwarran ka siinta Madaxweynaha JDS, Dawladda iyo Guddiga Qaranka ee Arrimaha Qaxootiga xaaladda Qaxootiga;

— Kala xiriiridda Dawladda Baahida Qaxootiga;

— Talo ka dhiibashada magacaabidda iyo xil ka wareejinta Maareeyaha Guud, Maareeya Guud Ku-xigeenka iyo Maareeyayaasha Hay'adda.

Qodobka 12aad

(Maareeyaha Guud)

Kh) Abaabulka aqoonta xirfadeed ee Qaxootiga isagoo la kaashanaya Hay'adda Qaranka ee ku shaqo leh iyo Ilo Dhaqaale u abuuridda Qaxootiga;

d) Fulinta hawlaha deg degga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn ee Hay'adda, isagoo la tashanaya Maamulaha Sare ee Qaxootiga;

r) Inuu warbixin joogta ah ka siiyo Maamulaha Sare ee Qaxootiga, xaaladda Qaxootigu ku sugan yihiin.

### Qodobka 13aad

### (Maareeye Guud Ku-xigeenka)

Maareeye Guud Ku-xigeenku wuxuu qabanayaa hawlaha soo socda:

— Inuu Gacan buuxda ku siiyo Maareeyaha Guud Hawlaha kala duwan ee Hay'addu u xilsaaran tahay;

— Inuu fuliyo hawlaha gaarka ah uu Maareeyaha Guud u xilsaaro, isagoo toos uga masuul noqonaya.

— Inuu sii wado hawlaha caadiga ah ee Maareeyaha Guud, marka uu maqan yahay ama ay jiraan sababo joogto ah ama ku meel gaar ah ee ka reebaya inuu xilkiisa guto.

### Qodobka 14aad

### (Xuquuqda Shaqaalaha)

1) Xuquuqda iyo waajibaadka Sharciga ah iyo xuquuqda dhaqaale ee Shaqaalaha Hay'adda waxaa xukumaya Sharciga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda, Sharciga iyo Xeerka Shaqaalaha Wakaaladaba Madax bannaan, Qodobbadooda la socon kara dabeecadda shaqada Hay'adda.

2) Maareeye Guud Ku-xigeenku wuxuu yeelanayaa guno u dhexeysa midda Maareeyaha Guud iyo Maareeyayaaha Waaxyaha, waxaana lagu xaddidayaa Xeer Madaxweyne.

3) Shaqaalaha Hay'adda ee joogtada ah waxay noqonayaan Shaqaale laga soo ergaystay Wasaaradaha iyo Wakaaladaha, iyo Shaqaale aan joogto ahayn ee toos Hay'adda loogu magacaabay, iyadoo la marayo habka shaqo qorista ee Sharciga ah.

Qodobka 15aad

(Hantida Hay'adda)

1) Hantida Hay'addu waxay ka kooban tahay:

a) Deeq Miisaaniyadeed oo Dawladdu bixiso Sannad walba, haddii loo baahdo.

b) Hantida lagu wareejiyey, ama mid dib lagu siiyo, looguna talo galay Hay'addu in ay xilkeeda k ugudato.

t) Deeqda Hay'adaha kala duwan ee Qaranka ama Dadweynaha Soomaaliyeed ay u fidiyaan Qaxootiga.

j) Kaalmada Qaxootiga uga timaadda Dibadda.

x) wax allaale wixii deeq ah ee Qaxootiga loogu tabaruco.

2) Hantida Hay'adda soo gasha iyo bixiddoodaba waxaa lagu dhaqayaa habka Diiwaangelinta iyo xisaabaadka ee Hay'adda Dawladda, waxana loo sameynayaa xisaab-xir.

Qodobka 16aad

(Maamulka iyo Kormeerka xisaabaha)

1) Hay'addu had iyo jeer waa in maamul hagaagsan ku dhaqan gelisaa Adduunka iyo hawlaha kale ee Lacagta iyo alaabta Qaxootiga loo keeno ku saabsan, iyadoo ilaalinayaa sida habboon ee Shuruudaha iyo Xeerarka Qaranka ku xusan.

2) Xisaabaha Hay'adda, Maamulaha Sare iyo Maareeyayaasha Hay'adda ka sokow waxaa kormeeri kara Hay'adda Baarista ee Qaranka.

Qodobka 17aad

(Dhameystir)

Madaxweynaha JDS, isagoo Dhegeystay talada Maamulaha Sare ee Qaxootiga, wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro Xeer iyo tilmaamo lagu dhameystirayo Xeerkan.

Qodobka 18aad

(Burrin)

Xeer kasta oo aan la socon karin ama ka soo horjeeda Qodobbada Xeerkan waa la burriyey.

Qodobka 19aad

(Dhaqangelid)

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO, 2 APR. 1981

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER Madaxweynaha JDS, L. 27 ee 10 Maajo 1981.

La wareegid dan Guud awgeed Laba Guri ku yaal Degmada Shangaani, uuna lahaa Shariif Saalax Xasan Cumar.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lambar 41, soona baxay 13kii Setember 1973, kuna saabsan bixinta Dhulka Dhismaha.

MARKUU ARKAY: Dekreetada Wasiirka Wasaaradda Hawlaha Guud Lambar W.H.G. 3/23/184, Taariihk 1 Febraayo 1979, taasoo lagu guddoomiyey in dan Guud awgeed loogala wareegay Shariif Saalax Xasan Cumar Guryo uu ku lahaa Degmada Shangaani.

MARKUU ARKAY:Xeerka Madaxweynaha JDS Lamb.

95/79, Taariikh 13 Dishember 1979, oo lagu qeexay in daarta Shariif Saalax Xasan Cumar lagala wareegay ay tahay midda loo yaqaan (FIMA) ee ku taal Degmada Shangaani, Dabaqeeda kore iyo kan hooseba, isla markaana lagu guddoomiyey in Shariifka loo celiyo qiimihii uu kaga Iibsaday Daartaas Bareera Alfreddo.

MARKUU ARKAY:Inaan la meelmarinin tilmaamihii ku qornaa Dekreetada kor ku sheegan, una muuqatay in loo baahan yahay in caddeen dheeraad ah laga baxsho nuxurka iyo ujeeddada dekreetadaas, gaar ahaan dhanka tilmaamidda Guryaha lala wareegay iyo qiimaha cawileelinta.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay daw tahay in Shariif Saalax Xasan laga siiyo kor socod macquul ah muddadii laga haystay qiimaha daarahaas lagala wareegay.

WUXUU SOO SAARAYAA

XEERKA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad

Waxaa dan Guud awgeed loogala wareegay Shariif

Saalax Xasan Cumar Labada Guri ee hoos ku tilmaaman, kuna yaal Degmada Shangaani:

a) Guriga ku tilmaaman qoraalka kala gadashada uu qoray Nootaayaha Xamar, Dr. Maxamed Xasan Jaasti, tirsigiisuna yahay Rep. N. 7813, taariikh 26.11.1977, qiimihiisuna ahaa Sh. So 350.000/= (Saddex Boqol iyo Konton Kun), lagana Iibsaday Antonietta Brera.

b) Guriga ku tilmaaman qoraalka kala gadashada uu qoray Netaayaha Xamar, Dr. Maxamed Xasan Jaasti, tirsigiisuna yahay Rep. N. 7814, taariikh 26.11.1977, qiimihiisuna ahaa Sh. So. 550.000/= (Shan Boqol iyo Konton Kun), lagana Iibsaday Brera Alfreddo.

Qodobka 2aad

Waxaa Shariif Saalax Xasan Cumar loo celinayaa megdhaw ahaan, qiimihii uu kula wareegay Labadaas Guri oo ah Sh. So. 900.000/= (Sagaal Boqol Kun), Kharajkii ku baxay kala wareejinta (Notaayo, Canshuur, IWM), iyo korsaar dhan 8% (Boqolkiiba Siddeed) Sannadkiiba, laga bilaabo 1da Febraayo 1979, ilaa taariikhda Dekreetada.

Qodobka 3aad

Fulinta Dekreetadan waxaa ka xil saaran Guddoomiyaha Bankiga Horumarinta Soomaalida, Lacagta ku Sheegan Qodobka horena waxaa laga bixinayaa Miisaaniyadda Bankiga Horumarinta Soomaalida.

Qodobka 4aad

Dekreetada dhaqangalkeedu wuxuu ka billaabanayaa 1da Febraayo 1979, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.—

MUQDISHO, 10 MAJ. 1981

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER Madaxweynaha JDS, L. 28 ee 1 Nofem. 1981.
Magacaabid Kaaliyaha Arrimaha Maamulka.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad (Xubinta 14) eeDastuurka J.D.S. arkay Xeerka Lam. yahay 46 ee 16.9.79, ee uu ku dhaqan galay Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Qod. 8/4/13/6 iyo 23 ee Sharciga Lam. yahay 6 soona baxay 12.2.80 (Sharciga Golaha Shacbiga Deganka Xamar).

ISAGOO ARKAY: Xeerka Lam. yahay 28 Diis. ee .21.2.76 iyo bedelaadii ka dambeysay ee Maamulka D/Hoose ee Xamar.

ISAGOO AY: Ugu muuqatay in baahi loo qabo in Maamulka D/Hoose ee Xamar ee aad u baad weyn loo magacaabo Kaaliyaha Maamulka.

MARKUU HUBSADAY: Tala jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho.

WUXUU SOO SAARAY XEERKAAN

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maalinta Madaxweynuhu Xeerkaan soo saxiixo waxaa Jaalle Dr. Cabdullaahi Salaad Warsame loo magacaabo Kaaliyaha Xoghayaha Guddiga X.H.K.S ee Arrimaha Maamulka D/Hoose ee Xamar, Ahna ku xigaha Duqa Magaalada Qaybta Maaliyadda.

Qodobka 2aad

Xeerkaan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ha ee J.D.S.

WAXAA SAXIIXAY

25 Okt. 1980

MADAXWEYNAHA JDS

(*Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre.*)

XEER Madaxweynaha JDS, L. 29 ee 10 Febraayo 1981.
Xeer Nidaamiye lagu fulinaayo Xeerka Qoyska.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambarkiisu yahay 23 soona baxay 11.1.1975;

ISAGOO AQOONSAN: Baahida loo qabo in la soo dejiyo Xeer Nidaamiye lagu fulinaayo Sharciga Lambarkiisu yahay 23 soona baxay 11.1.1975.

ISAGOO TIXGELINAYO: Go'aankii Golaha Wasiirada

WUXUU SOO SAARAYAA

XEER NIDAAMIYAHA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad

Ahmiyadda ballanqaadka uu u leeyahay Guurka

1) Heshiiska Guurka waxaa ka horeeya ballanqaad dhexmara Labada Qof oo isguursaneysa.

2) Labada dhinac waa ay u bannaan tahay in ay ka noqdaan ballanqaadkaas, hase yeeshee waxaa waajib ku ah dhinaca ka baxay in uu u sheego kan kale si asluub leh, iyadoo laga dhowrsanaayo in aysan dhibaato ka imaan.

3) Haddii Ninku uu iskiisa isaga baxo ballanqaadka, isagoo horey u bixiyey yarad kuma doodi karo in loo soo celiyo yaradkaas.

4) Haddii ay Gabadhu sabab u tahay jebinta ballanqaadka, dhinaca kale wax u bannaan tahay inuu ku doodo soo celinta yaradda ama wixii dhibaata ah ee gaaray.

## Qodobka 2aad

### Haweenka aan loo Ballanqaadi karin Guur

1) Haddii ay dhacdo in Gabar horey ugu jirtay ballanqaad Guur in ay Guursato nin kale iyadoo aan u sheegin dhinaca kale sida horey loogu sheegay Qodobka 1aad ee Xeer Nidaamiyaha, Guurkaasu waa ansaxayaa Sharci ahaan, hase yeeshee waxaa waajib ku ah iney ka magdhowdo dhinaca looga baxay ballanqaadka dhibaatada ballan ka bixiddu u keento.

2) Marnaba ma bannaana in la Guursado Naag nin kale ku xiran ama Sharcigu uu Guurkeeda xaaraantimeeyey ama cidda tirsaneysa.

## Qodobka 3aad

### Diiwaangelinta Guurka

1) Guur kasta oo aan soo marin Tillaabooyinka Diiwaangelinta ee lagu caddeeyey Qodobka 5aad ee Xeerka Qoyska loo aqoonsan maayo Rasmi ahaan Waajibaadka iyo Xuquuqda uu leeyahay.

2) Taas lagu dabbiqi maayo reer Miyiga ka fog meelaha Diiwaangelinta ilaa ay u suurtowdo in ay Diiwaangeliyaan.

3) Maxkamadda iska leh Diiwaangelinta waxaa weeye Maxkamadda Degmada ee awoodda u leh meesha Guurku ka dhacay ama Maxkamadda Degmada ee ugu dhow meeshaas.

4) Guddoomiyayaasha Maxkamadda Rafcaanka waxay awood Kormeer ah ku leeyihiin Maxkamaddaha Degmooyinka ee Gobolkooda si ay u hubsadaan in arrimahaas loo hirgeliyey si waafaqsan Sharciga.

## Qodobka 4aad

### GUUR LABAAD

1) Guur Labaad ee aan soo marin Shuruudda lagu

caddeeyey Qodobka 13aad ee Xeerka Qoyska waxba kama jiraan, haddii ninku Naagtii hore uu qabo.

2) Haddii uu dhaco Guur Labaad wuxuu noqonayaa mid la mid ah Xukunka Guurka Faasidka ah ama kan aan dhammeyn ee lagu xusay qaybta 4aad ee Qodobka 22 ee Xeerka Qoyska.

3) Marka Nin iyo Naag Labaad ay isla Guri galaan oo ay isu tagaan, waxyaabaha ka dhalan kara oo ah kuwa lagu sheegay qaybta 2aad ee Qodobka 23aad ee Xeerka Qoyska waa la aqoonsan yahay.

4) Degaanta Ijtimaaciga ah ee lagu oggolaan karo Guurka Labaad waxaa loola jeedaa meelaha xuduuda ah ama Miyiga ah.

## Qodobka 5aad

## DA'DA GUURKA

1) Haddii Wiilka ama Gabadha ay dhammeystaan 18 Sano, mid kasta wuxuu ikhtiyaar u leeyahay inuu Nolohiisa maamulo u guursadana si madax bannaan.

2) Gabadha Da'deedu gaarto 16 Sano ee aan dhammeysan 18 Sano waa ay u bannaan tahay in ay gasho heshiis Guur ah haddii uu oggolaado Weligeeda.

3) Maxkamaddu waxay awood u leedahay inay Fududeyso da'da Guurka ee Labada qof ee isguursaneysa haddii ay jirto dan Culus ama jirro Takhtar uu soo caddeeyey.

## Qodobka 6aad

## Weliga Gabadha aan qaan gaarin

1) Darajooyinka Wilaayadda ee lagu caddeeyey Qaybta 1aad ee Qodobka 19aad ee Xeerka Qoyska Garsooruhu waa inuu u raacaa sida ay u kala horreeyaan dadka Wilaayadda xaqa u leh.

2) Haddii Waligu diido in la Guursado Gabadha aan qaan gaarin ee uu Waligu u yahay ama uu meel ka

fog joogo, Wilaayaddu waxay u wareegeysaa Garsooraha jooga meeshaas ama qof Rukhsad ka haysata Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta si loogu Nikaaxiyo Ninka ay ikhtiyaarkeeda u doorato.

### Qodobka 7aad

### Ka Cararka Awoodda Walinnimada

1) Guurka Gabadha dhammaysatay 16 Sano oo iyadoo raalli ah raacda nin ay dooratay ayna isku Guursadaan meel u jirta 100 Km meesha uu Weligeedu deggan yahay waa ansaxayaa Sharci ahaan.

2) Hase yeeshee Ninka Gabadha aan qaan gaarin kala dhuuntay ama kala cararay awoodda Waligeeda waa la ganaaxayaa sida uu Sharcigu qabo.

3) Haddiise la bixidda Gabadha ay ku jirto khatalaad ama khasbid si kastaba ha ku dhacdee, Guurkaas waxba kama jiraan, Ninkii ku kacana waa in lala tiigsadaa Xeerka Ciqaabta.

### Qodobka 8aad

### GUURKA QOFKA WAALAN

Marka keliya ee Qofka waalan lco oggol yahay Guurka waxaa weeye marka Guddi Takhaatiir ah day cad deeyaan in uu baahi lagama maarmaan ah u qabo Guurka xagga Caafimaadka awgeed.

### Qodobka 9aad

### GUURKA AAN DHAMMEYN AMA FAASIDKA AH

Guurka aan dhammeyn ama Faasidka ah waxaa loola jeedaa sida lagu sheegay qaybta 4aad ee Qodobka 22 ee Xeerka Qoysska Guurka uu ka dhiman yahay Shardi la doonayo in laga helo oo lagu sheegay Xeerkaan kana duwan kuwa lagu caddeeyey qaybta 3aad ee Qodobkaas.

## Qodobka 10aad

## WADA DEGGANAANSHAHA QOYSKA

1) Afada waxaa waajib ku ah iney Ninkeeda raacdo kana dambeeyso u hogaansanaatana, maxaa yeelay isaga ayaa reerka odey u ah oo ay mas'uuliyad buuxda ka saaran tahay.

2) Hase yeeshee haddii ay jirto dhibaato ama waxyaabo ka hor istaagaya Sharci ahaan in ay afadu u raacdo Ninkeeda meesha uu rabo wax eed ah oo ka soo gaaraya ma jirto xaqeedana ma gefeyso.

3) Haddii ay Labada isqaba ku wada noolaaneyn si nabad ah oo ay is nacaan ama midkood naco kan kale la iskuma khasbi karo haddii aan laga dhexdhalin karin heshiis.

4) Qofkii Labadooda ka mid ah ee gefkiisu sabab u noqdo Furidda ama Fasakha wuxuu Garsooruhu la tiigsanayaa Qodobka 44 ee Xeerka Qoyska.

## Qodobka 11aad

## FURITAANKA LAGU HESHIIYO

1) Marka Ninka iyo Xaaskiisu ku soo heshiiyaan Maxkamadda Dibeddeeda iney isfuraan, markaasoo kale Maxkamaddu waa iney ka oggolaataa inuu rido Dalaaqa iyadoo la dhowrayo qaybta 4aad ee Qodobka 36aad ee Xeerka Qoyska.

2) Heshiiska ku saabsan isfuridda Labada dhinac oo ay Maxkamaddu oggolaaneyso waa in lagu qoraa Warqad Rasmi ah iyagoo ku soo caddeynaya iney meel isla dhigeen Saddexdaan arrimood oo soo socda:

b)—Aayatiinka Ilmaha haddii ay leeyihiin.

t)—Meherka Afada.

j)—Alaabta Guriga.

3) Haddii ay caddaato in Ninku Naagta uu ku furay si qarsoodi ah oo aan Maxkamadi ogey waxba kama jiro Furitaankaas aan Sharciga waafaqsaneyn.

4) Haddii Ninku doono in uu soo rajceysto xaaskiisa uu ku furay hal ama Laba Dalqadood waa in uu rajceyesiga kaga hor dhawaaqaa Garsooraha hortiisa iyadoo Naagtu og tahay, joogtana meesha lagu soo rajceysanayo.

Qodobka 12aad

FASAKHA

1) Haddii Maxkamadi kala Fasakhdo nin iyo Naagtiisa, Fasakhaasu wuxuu yeelanayaa xukunka Dalaaqa rajciga ah.

2) Haddii Ninka iyo Naagta la kala Fasakhay ay doonaan in ay isu soo noqdaan muddada ciddada dhexdeeda waxaa shardi ah in Naagtu raali ka tahay rajceysiga iyadoo joogta, ikhtiyaarna leh.

Qodobka 13aad

FASAKHA MAS'RUUF LA'AAN DARAADEED

Muddada ku saabsan maqnaashaha Ninka ama xukun ku dhacay ee lagu xusay xarafka b) iyo d) ee Qodobka 43aad ee Xeerka Qoyska kama reebayso inay weydiisato Fasakha masruufka la'aanta daraadeed haddii aysan awood u lahayn iney is-masruufto.

Qodobka 14aad

DHAQAN GELID

Xeer Nidaamiyaha wuxuu dhaqan gelayaa markii uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. iyo Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Soomaaliyeed.

MUQDISHO, 10 FEB. 1981

Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

MADAXWEYNAHA JDS

WASIIRKA GARSOORKA IYO ARRIMAHA DIINTA

(Jaalle Dr. Axmed Shire Maxamuud)

XEER: MADAXWEYNAHA JDS L 30 ee 11 Marso 1981 Magacaabid Maamulaha Sare ee Hay'adda Qaxootiga Qaranka.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 26, Taariikh 12.4.1981, kuna saabsan dhismaha Hay'adda Qaxootiga Qaranka.

MARKUU ARKAY: Gaar ahaan Qod. 11aad ee isla Xeerka kor ku sheegan.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la magacaabo Maamulaha Sare ee Hay'adda Qaxootiga Qaranka.

WUXUU SOO SAARAYAA

XEERKA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad

1) Xildhibaan Cabdi Maxamad Tarrax waxaa lagu magacaabay Maamulaha Sare ee Hay'adda Qaxootiga Qaranka.

2) Maamulaha Sare ee Hay'adda Qaxootiga Qaranka darajadiisu waa heer Wasiir, wuxuuna yeelanayaa xuquuqda Wasiirrada Wasaaradaha Dawladda.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO, 11 MAJ 1981
MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

XEER Madaxweynaha JDS, L. 31 ee 28 Febraayo 1981.
Dallacaad Saraakiileed.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobka 82aad,

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambar 2 ee 23/12/1972 oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed,

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed ee ku qoran Xaashida Lambar XOG/A/8/1 ee 28.2.1981.

WUXUU XEERAY:

Qodobka 1aad

In Saraakiiha Boliska ee hoos ku qoran loo dallacsiiyo derejada midkasta magaciisu ku hor qoran laga bilaabo 1.3.1981:

1. G/Dhexe Cabdi Maxamed Nuur —G/Sare
2. G/Dexe Xuseen Weheliye Shuuriye —G/Sare
3. G/Dhexe Maxamuud Xirsi Maxamed —G/Sare
4. L/X. Cabdullaahi Cabdi Maxamed —Dhamme
5. X/le Cabdulqaadir Axmed Cali —L/Xiddigle

Qodobka 2aad

Xeerkani Deg Deg buu u dhaqan gelayaa, waxana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 2, bogga lamb. 151
Muqdisho 21 Maarso 1981
Hantidhawraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

XEER Madaxweynaha JDS, L. 32 ee 3 Maarso 1981.
Dallacaad Saraakiileed.

—MADAXWEYNAHA J.D.S.—

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobka 82aad,
ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambar 2 ee 23/12/1972 oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed,

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed ee ku qoran Xaashida Lambar XOG/A/8/1 ee 3.3.1981.

WUXUU XEERAY:

Qodobka 1aad

In Saraakiiha Boliska ee hoos ku qoran loo dallacsiiyo derejada midkasta magaciisu ku hor qoran laga bilaabo 3.3.1981:

1. Dhamme Cumar Axmed Xuseen —Gaashaanle

2. L/X. Cali Maxamed Cumar —Dhamme

Qodobka 2aad

Xeerkani Deg Deg buu u dhaqan gelayaa, waxana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

MUQDISHO, 3.3.1981.

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 2, bogga lamb. 150
Muqdisho, 21 Maarso 1981.
Hantidhawraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

XEER Madaxweynaha JDS, L. 33 ee 28 Abriile 1981.

U magaabid Jaalle Ismaaciil Cali Abokar, Madaxweyne Ku-xigeenka 3aad ee JDS.

—MADAXWEYNAHA J.D.S.—

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Qod. 84aad, xubintiisa 1aad ee Dastuurka.

MARKUU TIXGELIYEY: Tayada iyo Culeyska Xilalka, hawlaha iyo waajibaadka saaran Madaxa Qaranka, lagama maarmaanna ay noqotay in la magacaabo Madaxweyne Ku-xigeen 3aad.

MARKUU DHEGEYSTAY: Ra'yiga Galaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo ka Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

XEERKA SOO SOCDA:

Qodobka 1aad

Jaalle Ismaaciil Cali Abokar waxaa lagu magacaabay Madaxweyne Ku-xigeenka 3aad ee Jamhuuriyadda.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa 28ka Abriile 1981, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

MUQDISHO, 28.4.1981

MADAXWEYNAHA JDS

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER Wasaaradda X. Xoolaha Dh. iyo Daaqa, L. 34 ee 15 Maarso 1981.

Diiwaangelinta Shirkadda.

WASIIRKA

MARKUU ARKAY Sharciga Horumarinta Dhulka Daaqa lam. 3 ee 4.2.79, Qod. 5aad, lam. 7aad;

MARKUU ARKAY warqadda lam. WDQ/2/1/2148/79 ee 11.9.79 oo loogu oggolaaday Shirkadda Naaxinta Xoolaha «East African Distributors» dhul saddex Km. oo wareeg ah lagana hirgelinayo Mashruuca Naaxin Xoolaad.

MARKUU ARKAY Go'aanka lam. G/SH/H 747/80 ee 29.8.80 kuna saabsanaa ansaxinta Guddiga Gobolka Shabeelaha Hoose ee la xiriira Shirkadda Naaxinta Xoolaha inay ka hirgeliso Mashruucaas Degmada Wanla Weyn.

MARKUU ARKAY Go'aanka ay si wadajir ah u soo saareen Guddi ka kooban Wakaaladda Daaqa Qaranka iyo Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo HRM lam. WDQ/2/4/3313/80 ee 14.8.78, kuna saabsanayd ansaxinta Shirkadda Naaxinta Xoolaha ee «East African Distributors».

MARKUU DHEGEYSTAY Talada Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Daaqa Qaranka inay Shirkaddani ka qaadan karto kaalin weyn xagga kobcinta dhaqaalaha dalka.

ISAGOO TIXGELINAYA Kaalinta weyn ee Shirkaddaani ay ka qaada nkarto kobcinta dhaqaalaha dalka iyo inay lamaga maarmaan tahay dhiirrigelinta Shirkaddaha noocaas oo kale ah.

WUXUU XEERINAYAA

Qod. 1aad

In dhulka loo aqoonsaday Shirkadda Naaxinta Xoolaha ee «East African Distributors» oo ku fadhiya dhul dhan saddex Km. oo wareeg ah ee ku yaalla meesha la yiraahdo «Xabaal Fiideey» una jirta Degmada Wanla Weyn 11 Km. waddada Muqdisho/Wanla Weyn, loo aqoonsado goob ay Shirkaddu ku horumarinayso Xoolaha.

Qod. 2aad

Xeerkaan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Wasiirku waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho, 24 Maarso 1981.

Wasiirka Wasaaradda X. Xoolaha

Dhirta iyo Daaqa

Dr. Maxamed Cali Nuur

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA

HADDUU ARKAY dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY in Jeega dhumay oo lambarkiisu ahaa 184221, lagana s oosaaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Marka, kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 5.000, uu iska lahaa Sheekh Maxamed Maxamuud sida ku cad warqadda lamb. 000242, taariikh 30.5.81 ee Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Marka;

HADDUU ARKAY Qod. 69 Sharciga lam. 29.9.65;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega Lam. 184221 oo ku qoran magaca Sheekh Maaxmed Maxamuud ayna ku jirto Sh. So. 5.000;

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka laanta Marka u bedelo Sheekh Maxamed Maxamuud jeega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, haddii, inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.
Muqdisho, 30.5.81.

Guddoomiyaha Max. G. Banaadir

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 670/bis